

Waxaanu u weydiinaynaa waayo waanu daryeelaynaa

SOMALI

Af-Soomaali



Bukaankasta oo yimaada CHCO wuxuu mudan yahay inuu helo daryeelka ugu wanaagsan. Waxaanu weydiinaa su'aalo ku aadan isirka, qoomiyada, aqoonsiga iyo luuqada si ay nooga caawiyaan inaan si fiican u barano ilmaha. Jawaabahaagu waxay naga caawin doonaan inaan horumarino daryelkayaga dhammaan caruurta. **Waxaanu u weydiinaynaa waayo waanu daryeelaynaa.**



Waa maxay sababta aan u weydiinayno su'aalaha la xidhiidha isirka, qoomiyada, aqoonsiga iyo luuqada?

Qofkastaaba wuxuu leeyahay aqoonsi gaara. Jawaabahaagu waxay naga caawin doonaan inaan hubino in qofkastaaba helo daryeel u gaara. Su'aalahani waxay naga caawiyaan:

- Ilaalino baahiyahaaga dhaqanka iyo qiyamkaaga
- Bixino adeegyo si aan u horumarino daryeelka
- U abuurno barnaamijyo ku caawinaya adiga iyo bulshadaada
- Buuxino heerarka shuruucda



Yaa fiirinaya macluumaadkan?

Dadka kaliya ee arki kara macluumaadkani waa shaqaalaha diwaangalinta, kooxdaada daryeelka, maamulayaasha cisbitaalka iyo xubnaha kooxda horumarinta tayada. Waayo tani waxay ka qeyb tahay diwaanka caafimaadkaaga, waa macluumaad caafimaad oo la ilaaliyey.



Maxaad ugu baahan tahay macluumaadkan?

Macluumaadkani wuxuu naga caawinayaan inaan kuu daryelno si fiican adiga iyo qoyskaaga oo aan ku siino adeega ugu wanaagsan markaad aad noogu baahan tahay. Tusaale, haddii aan ogaano in luuqada ilmahaagu doorbidayo aanay ahayn Ingiriisi, waxaanu ku dadaali karnaa inaan kuu helno turjumaan. Macluumaadkani sidoo kale wuxuu naga caawinayaan inaan waxbadan ka ogaano bulshada aan daaweyno. Macluumaadka aad nala wadaagtid kaliya waxa lala wadaagayaa Cisbitaalka Caruurta ee Colorado si loogu horumariyo adeegyada iyo barnaamijyada aan bixino.



Ka waran haddii aanan rabin inaan ka jawaabo?

Kaliya nasoo ogeysi, waxaanu tixgalin doonaa codsigaaga waanan qoran doonaa tan. Haddii aad badeshid go'aankaaga, waxaad dib uga cusbooneysi kartaa MyChart ama xubin kooxda ka tirsan wakhti kasta.



Children's Hospital Colorado
Here, it's different.[™]